Macluumaadka Ardayga

Magaca Dambe ee Ardayga:
Magaca Hore ee Ardayga :
Fasalka / Lambarka Aqoonsiga Ardayga:

Masuuliyadaha Adeegsiga Teknoolajiyadda ee Waalidka/Mas'uulka

Omaha Public Schools waxay siin karaan ardaygaaga aalad teknolojiyadeed sannad dugsiyeedka 2021- 2022. Maadaama aad tahay waalidka ama mas'uulka sharciga ah ee ardayga dhigta dugsiga, waa inaad qirtaa mas'uuliyadaha adeegsiga teknolojiyadda ee hoos ku qoran. Si aad u muujiso inaad akhriday oo fahantay Masuuliyadaha Adeegsiga Teknooljiyadda ee Waalidka/Mas'uulka, **fadlan ku qor sanduuq kasta oo hoos ku yaala xarfaha ugu horeeya labadaada magac.**

☐ **Muddada:** Ardaydu waxay adeegsan karaan aaladda teknooljiyadda Omaha Public Schools inta lagu jiro sannad dugsiyeedka ee ay qoran yihiin dugsiga. Marka la joojiyo dhigashada dugsiga ee ardayga, Waalidka/Mas'uulka ayaa ku soo celin doona aaladda teknoolajiyada muddo laba toddobaad gudahood kadib marka la ogeysiiyo, iyadoo xaaladeedu tahay isla sidii lagu bixiyay. Ku guuldaraysiga soo celinta aalada teknooljiyaddu waxay dhalin doontaa in Omaha Public Schools ku yeeshaan Waalidku/Mas'uulka qiimaha buuxa ee aaladda teknooljiyadda, iyo khidmadda qareenka iyo kharashyada la xiriira soo ceseshada aaladda teknolojiyadda. Dugsiyada Dadweynaha Omaha sidoo kale waxay xaq u leeyihiin inay joojiyaan heysashada [aaladda] haddii Waalidka/Mas'uulka iyo/ama ardayga la rumeysan yahay inay jabiyeen qeyb kamid ah Mas'uuliyadahan Adeegsiga Teknolojiyada, Adeegsiga La Oggolyahay ee Ardayga iyo Tilmaamaha Badbaadada Internetka ama Xeerka Anshaxa Ardayga.

☐ **Mulkiyada:** Aaladda teknoolajiyaddu waa hantida Omaha Public Schools. Marnaba mulkiyada looma wareejin doono Waalidka/Mas'uulka ama ardayga.

☐ **Isbeddelka Cinwaanka:** Aaladda teknoolajiyaddu waa inay taalaa (lagu adeegsadaa) cinwanka ku qoran foomka diiwaangelinta ee ardayga. Ogeysiis qoraal ah waa in la siiyaa Omaha Public School 30 maalmood gudahood haddii cinwaanku isbeddelo.

☐ **Xaaladda:** Waalidku/mas'uulku wuxuu aqbalay inuu ku soo sheego wixii lumitaan ama waxyeello ah ee ku timaada aaladda teknoolajiyadda muddo 3

maalmood gudahood kadib dhacdada. Waalidka/Mas'uulka ayaa ku ogeysiin doona macallinka iimeyl ahaan. Waalidku/Mas'uulka ayaa gebi ahaanba mas'uul ka ah wixii lumitaan ama waxyeelo ah ee ku timaada aaladda teknoolajiyadda. Haddii aalada teknoolajiyaddu ay lunto ama la xado inta dugsiga la joogo, dhismaha dugsiga ayaa la shaqeyn doona sarkaalkooda amniga ama sarkaalka kheyraadka dugsiga si uu u gudbiyo warbixin booliis.

☐ **Dayactirka iyo Hagaajinta:** Waalidka/Mas'uulka ama ardayga ayaa mas'uul ka ah codsashada dayactirka iyo hagaajinta aaladda teknoolajiyadda inta uu heysto ama ay heysato. Waalidka/Mas'uulka ama ardaygu waa inay u sheegaan shaqaalaha dugsiga inay u baahan yihiin in la hagaajiyo aaladda teknoolajiyadda.

☐ **Adeegsiga Teknoolajiyadda:** Waalidka/Mas'uulku wuxuu aqbalay waxyaabaha soo socda:

1) Aaladda teknoolajiyadda waxaa loo isticmaali doonaa waxbarashada ardayga inta uu qoran yahay Omaha Public Schools ee looma adeegsan doono faa'iido qof kale amaba ujeedo kale.
2) Barnaamij kasta oo softiweer ah waa inuu la raacaa, oo loo adeegsadaa si waafaqsan, laysanka iyo/ama heshiiska adeegsiga ee la socda barnaamijkaas softiweerka ah.
3) Dhammaan adeegsiga aaladaha teknoolajiyaddu waxay raaci doonaan xeerarka iyo sharciyada Omaha Public Schools ee la xiriira isticmaalka Shabakadda/internetka. (Ka eeg buug gacmeedka).
4) Waalidka/Mas'uulka ayaa gebi ahaanba mas'uul ka ah inay hubiyaan in dejinta (settings) barnaamijyada softiweerka ah, qaabeyntooda caadiga ah, iyo mudnaanaha maamuleed (administrative privileges) aan laga beddelin ama laga doorin dejintii asalka ahayd ee ay aaladdu lahayd markii la keenay.
5) Waalidka/Mas'uulka iyo ardayga ayaa si wadajir ah mas'uul uga ah inay xafidaan Aqoonsiyada Adeegsadayaasha (User ID) iyo furayaasha sirta ah si looga hor tago isticmaalka aan la oggalayn.

Barnaamijka Ilaalinta Aaladda ee Ikhtiyaariga ah

Waalidka/Mas'uulka ayaa mas'uul ka ah lumida, xatooyada, ama waxyeelada ku timaada aaladda. Degmadu waxay aasaastay Barnaamijka Ilaalinta Aaladda ee Ikhtiyaariga ah. Waalidka/Mas'uulka ayaa iska qori kara Barnaamijka Ilaalinta Aaladda ee Ikhtiyaariga ah ee sannad dugsiyeedka 2021-2022 iyagoo **bixinaya khidmad sannadeedka halka mar ah $20 aaladdiiba**. Waalid/Mas'uul kasta oo diida inuu ka qeybqaato Barnaamijka Ilaalinta Aaladda ee Ikhtiyaariga ah wuxuu mas'uul ka noqon doonaa qiimaha dhabta ah ee lagu beddelayo ama lagu hagaajinayo wixii aalad lunta, la xado ama waxyeelo soo gaadho. **Ka qeybqaadashada Barnaamijku waa Ikhtiyaari.**

☐ **Daboolida:** Ka qeybgalka Barnaamijka Ilaalinta Aaladda ee Ikhtiyaariga ah, kumbuyuutarada laabtobka ah ama aaladaha elektiroonigga ah ee kale ee la daboolay ayaa la hagaajin doonaa ama la beddeli doonaa iyada oo aan wax kharash ah laga qaadin Waalidka/Mas'uulka, haddii waxyeellada ama lumista aaladda ay

sababeen waxyaabahan soo socdaa mooyee:

1) Lumida aan Sharaxaada Lahayn ama Waayida aan La Garanayn Sababteeda: Degmadu waxaa laga yaabaa inaysan daboolin lumida ay sababtay awoodid la'aanta helida aaladda ilaa ay jiraan caddeymo taageeraaya in hantida la xaday.
2) Ku Guuldareysiga Ogeysiinta Booliiska Haddii Aaladda la xado: Haddii aaladda la xaday, waalidka/mas'uulka waxaa looga baahan yahay inay booliiska ogeysiiyaan isla markiiba markay oggaadaan in aaladda la xaday. Barnaamijku ma bixiyo caymis haddii ka qeybgalayaashu ay ku guul darreystaan inay booliska ogeysiiyaan.

3) Falalka Ula Kaca ah Barnaamijku ma daboolayo khasaaraha ka dhasha waxyeellaynta ula kaca ah ama burburinta hantida lagu daboolay qorshahan.
4) Falalka Khiyaanada ah: Barnaamijku ma daboolayo khasaaraha ka dhasha falalka khiyaanada ama sharci-darrada ah.
5) Xatooyada Ka Timaada Baabuur Aan La Ilaalinayn: Barnaamijku ma daboolayo khasaaraha ama waxyeellada ka dhasha baabuur aan la ilaalinayn marka laga reebo marka uu si amaan ah u xiran yahay, daaqadahiisu si buuxda u xiran yihiin, isla markaana ay jiraan cadeymo muujinaya in soo galitaanka gaariga ay ahayd mid la khasbay.
6) Hagaajinta aan La Fasaxin: Barnaamijku ma daboolayo khasaaraha ka yimaada hagaajinta la isku dayay ama uu sameeyay farsamo yaqaan aan degmadu u shaqeyn.
7) Warbixinta Dib Dhacda: Barnaamijka waxaa laga yaabaa inuusan daboolin waxyeellada ama khasaaraha aan la soo sheegin 3 maalmood gudahood.
8) **Qalabka aan la daboolin Barnaamijku ma daboolayo xadhkaha korantada, qalabka aaladda, shandadaha, xadhkaha dabka, ama qalabka kale ee la bixiyo.**

Degmadu waxay qaadan doontaa go'aan haddii aaladda waxyeellowday u baahan tahay la hagaajiyo ama in la beddelo. Waaxda Magdhowga Shaqaalaha Degmada & Maareynta Ceymiska ayaa go'aan ka gaari doona haddii duruufaha waxyeellada ama lumida lagu daboolayo Barnaamijka, go'aamadaasina waa kuwa kama dambeys ah.

Doorashada Ilaalinta Aaladda ee Ikhtiyaariga ah ee Waalidka/Mas'uulka

Waxaan sameeyay doorashadan la xiriirta Barnaamijka Ilaalinta Aaladda ee Ikhtiyaariga ah: Haa, waxaan doortay inaan ardaygayga qoro [barnaamijka] **Ilaalinta aaladda ee ikhtiyaariga ah ee Degmada.**
Waxaan soo raaciyay lacag dhan $20.

Maya, Waan diiday inaan ardaygayga qoro [barnaamijka] ilaalinta aaladda ee ikhtiyaariga ah ee Degmada. Waxaan fahamsanahay inaan mas'uul ka ahay qiimaha dhabta ah ee beddelka ama hagaajinta wixii qalab tiknolojiyeed ah ee lumay, la xaday ama waxyeelloobay intii aysan aaladdu oolin dhismaha Degmada.

Qirida iyo Saxeexa Waalidka/Mas'uulka:

Waan akhriyay ama waa la ii sharaxay waanan fahmay Mas'uuliyadaha Adeegsiga Teknoolajiyadda, Adeegsiga La Oggolyahay ee Ardayga, Tilmaamaha Badbaadada Internetka, Xeerka Anshaxa Ardayga iyo Barnaamijka Ilaalinta Aaladda ee Ikhtiyaariga

ah. Waxaan aqbalay inaan u hoggaansamo iyo aan xaqiijiyo in ardaygaygu u hogaansamo xeerarka iyo shuruudaha ku xusan Mas'uuliyadaha Adeegsiga Teknoolajiyadda, Adeegsiga La Oggolyahay ee Ardayga, Tilmaamaha Badbaadada Internetka iyo Xeerka Anshaxa Ardayga waxaanan aqbalay inaan ku koobo adeegsiga aaladdan ujeeddooyinka waxbarasho. Waxaan sameyn doonaa dedaal kasta si aan u xaqiijiyo in ardaygaygu u hogaansamo xeerarkan iyo shuruudaha halkan ku yaala. Waxaan fasax u siinayaa ilmahayga inuu helo isla markaana adeegsado teknoolajiyadda ay bixisay Degmadu.

Omaha Public Schools waxay ku dedaali doonaan xaddidaada helitaanka ardayda ee agabyada xunxun iyadoo si joogto ah loo adeegsanayo teknoolajiyadda ilaalinta (sida shaandheeyaha boggaga internetka), si kastaba ha noqotee, waxaan fahansanahay inaysan suurtagal ahayn inay Degmadu xakameyso oo ay xaddiddo helida dhammaan waxyaabaha aan habooneyn ee laga heli karo aaladdaha ardayga ee Degmada.

Degmadu mas'uul kama aha wixii khasaaro ah ee ka dhasha adeegsiga teknoolajiyadda ay degmadu bixisay mana dammaanad qaadayso in teknoolajiyadda ama nidaamyada shabakadda Degmada ee taageera adeegsiga ardayga la heli doono wakhti kasta.

Markaan saxeexo dukumintigan waxaan aqbalay inaan u hoggaansamo shuruudaha kor lagu soo sheegay oo aan qaato mas'uuliyada daryeelka iyo adeegsiga saxda ah ee teknoolajiyada degmadu bixisay. Waxaan fahansanahay in haddii aniga ama ardaygaygu ku guuldareysano inaan ilaalinoo dhammaan xeerarka halkan ku yaala, helida teknolojiyadda, internetka, iyo waxyaabaha kale ee elektiroonigga lanoo didii karo mustaqbalka. Intaa waxaa dheer, ardaygayga waxaa lagu sameyn doonaa anshax marin sida ku qeexan Xeerka Anshaxa Ardayga ee Omaha Public Schools. Waxaan halkan kaga dulqaadayaa oo aan kaga dhaafayaa - Omaha Public Schools, saraakiisheeda, xubnaheeda guddiga, shaqaalaheeda, iyo wakiiladooda, iyo hay'ad kasta oo ku xiran Degmada, - dhammaan mas'uuliyada, khasaaraha, kharashka, ama sheegashada dhaawaca ama waxyeellooyinka aan aniga ama ardaygaygu la kulano kana dhalata adeegsiga aaladda Degmada ee ardayga.

Magaca Waalidka/Mas'uulka (fadlan qor):	
Taariikh:	Saxeexa Waalidka/Mas'uulka

Macluumaadka Ardayga

Magaca Dambe ee Ardayga:
Magaca Hore ee Ardayga :
Fasalka / Lambarka Aqoonsiga Ardayga:

Adeegsiga La Oggolyahay ee Ardayga iyo Tilmaamaha Badbaadada Internetka

Omaha Public Schools waxaa laga yaabaa inay siiyaan ardayda taablat ama koombuyuutar laabtob ah si loo adeegsado inta lagu gudajiro waxbarashada waji ka wajiga iyo ta guriga, labadaba, waxaana loogu talagaly in loo adeegsado kor u qaadista guusha iyo bixinta fursado waxbarasho oo dabacsan. Tilmaamahani waxay bixinayaan macluumaad ku saabsan waxyaabaha Degmadu ka filayso ardayda iyo qoysaska la siiyo aaladdahan koombuyuutarka ah. Tilmaamahan ka sokow, adeegsiga teknoolajiyadda ay degmadu bixiso ama shabakada waxay ardayda uga baahan tahay inay u hoggaansamaan Xeerka Anshaxa Ardayga ee OPS. Tilmaamo dheeri ah ayaa lagu dari karaa hadba sida loogu baahdo waxaana lagu sii daba dari doonaa halkan. Si aad u muujiso inaad akhrisay oo fahantay Adeegsiga La Oggolyahay ee Ardayga iyo Tilmaamaha Badbaadada Internetka, fadlan sanduuq kasta ku qorlabada xaraf ee ugu horeeya magacyadaada .

☐ **Masuuliyadaha Ardayga:** Ardaydu waa inay si mas'uuliyad leh u isticmaalaan teknoolajiyada degmada oo ay fahmaan sida habboon ee la aqbali karo ee loo adeegsado ilaha teknolojiyadda iyo shabakadda ee degmada. Ardaydu waa inay ka dhigaan aaladdaha ay bixisay Degmadu kuwo badqaba, amaan ah, oo habsami u shaqeynaya. Ardayda iyo qoysaska waxay adeegsan doonaan caqligooda marka ay daryeelayaan iyo dayactirayaan teknoolajiyadda ay degmadu bixiso. Ardaygu wuxuu:

1) U hogaansami doonaa tilmaamahan iyo kuwa ku qoran Buug-gacmeedka Ardayga ee OPS iyo Xeerka Anshaxa Ardayga mar kasta oo aaladda lagu istcimaalo gudaha iyo dibada dugsiga.
2) **U dabeyn doonaa aaladdiisa si joogto ah** si loo xaqiijiyo in dugsiga lala yimaado iyadoo buuxda (fasaladu awood uma laha inay ardaydu aaladdahooda ku dabeeyaan inta lagu jiro maalinta).
3) Muujin doonaa **habdhaqan wanaagsan inta uu internetka ku jiro**. Ardaydu waa inay ku adeegsadaan luqad habboon dhammaan wada-xiriiradda oo ay ka fogaadaan aflagaado, fisqi iyo hadalada cayda ah ama

cadhada dhalin kara. Cagajugleynta internetka, oo ay ku jiraan weerarada shaqsiyeed ama hanjabaada ka dhanka ah qof ee la sameeyo iyadoo la adeegsanayo teknoolajiyadda ay degmadu leedahay ama ta uu qofku leeyahay lama oggola waana in la wargeliyaa shaqaalaha dugsiga ee masuulka ka ah.

4) **Xushmee shaandheynta internetka** iyo tallaabooyinka amni ee ku jira taablatka ama laabtobka. Dhamaan aaladdaha kombuyuutarka ee ardayda waa la qaabeeyay si waxyaabaha ku jira internetka

loo shaandheeyo marka ardaygu dugsiga joogo iyo marka uu isticmaalayo shabakad kasta oo dadweyne ama gaar ah.

5) Si joogto ah u keydi faylasha xogta ee muhiimka ah. Waxaa lagula tallinayaa ardayda **inay faylasha ku keydiyaan Cloud iyagoo adeegsanaya qeybta keydka ee banaan ee Office 365 OneDrive.** OPS waxay cusbooneysiin (update) doontaa oo ay dayactiri doontaa aaladda iyagoo mararka qaarkood sawiraya. Ardayda ayaa horay loo ogeysiin doonaa dayactirkan. Dhammaan faylasha ardayda ee aan lagu keydin seerfarka keydka ama meelaha kale ee wax lagu keydiyo ayaa laga yaabaa in la waayo inta lagu gudajiro hanaankan [dayactirka]. Qof kaalmo weydiiso haddii aadan aqoon sida loo keydiyo feylasha.
6) U adeegso teknoolajiyadaada ujeeddooyinka la xiriira dugsiga oo keliya kana fogow u adeegsiga ujeeddooyinka ganacsi ama siyaasadeed.
7) **Raac sharciyada xuquuqda daabacaada iyo tilmaamaha adeegsiga cadaalada ah** oo kaliya soo dejiso ama dir muusig, muuqaal ama waxyaabaha kale ee ardayda loo oggol yahay ama sharci ahaan la oggol yahay in dib loo soo saaro ama loo adeegsado.
8) U diyaari inuu kormeero maamulaha ama macallinku wixii farriimo ama faylal ah ee loo diro ama laga helay meel kasta oo internetka ah adigoo isticmaalaya teknoolajiyadda degmada. **Ardayda ayaa la ogeysiiyay <u>in aanay ku lahayn wax xuquuq asturnaan ah</u> aaladda ay Degmadu leedahay.** Faylasha la keydiyo iyo macluumaadka laga eegay, lagu soo dejiyay ama lagu diray teknoolajiyadda ay degmadu leedahay waa la arki karaa, lala socon karaa ama meel ayay ku keydin kartaa Degmadu wakhtigay doonto.
9) Isla markiiba ogeysii macallinkooda ama maamulaha barnaamijka haddii dhibaato amni laga helo kombiyuutarada dugsiga, shabakadda, ama khadka internetka.

Xayiraadaha Ardayga:

1) **Ardaygu ma calaamadeyn karo, waxba kuma qori karo, ama kuma dhejin karo waraaaqo** taablatka, laabtobka, ama shandadaha ay degmadu bixisay.
2) Ardaygu ma sheegi karo ama ma baahin karo macluumaad shakhsiyeed oo qof lagu garan karo, feylal ama wada-xiriirka dadka aan la aqoon iyadoo adeegsanaya iimeyl ama qaababka kale ee internetka.
3) **Ardaygu iskuma dayi karo inuu tirtiro, ka gudbo amaba beddelo** softiweerka, dejinta aaladda, ama qaabeynta shabakadda ee lagu shaandheeyo internetka.
4) Ardaygu iskuma dayi karo inuu u galo shabakadaha iyo teknoolajiyaddaha in ka baxsan inta loo oggolaaday Tan waxaa ku jira isku(dayyada**) lagu isticmaalayo koonto qof kale iyo/ama furaha**

sirta ah ama galitaanka shabakadaha waayarlaska ah ee furaha sirta ah leh.

5) **Ardaygu ma wadaagi karo furayaasha sirta ah ama iskuma dayi karo inuu oggaado furayaasha sirta ah**. Wadaagista furaha sirta ah lama oggola waxaanay dhalin kartaa in lagugu sameeyo anshax marin waxaanad mas'uul ka noqonaysaa ficilada dadka kale haddii ay mashaakil ka yimaadaan isticmaalka aan la fasaxin.
6) **Ardaygu kama soo dejisan karo iyo/ama kagama shuban karo wax barnaamijyo, faylal, ama ciyaaro ah** Internetka ama ilaha kale kumana shubi karo kombuyuutar kasta oo ay Degmadu leedahay. Tan waxaa ku jira soo bandhigida ula kaca ah ee fayrasyada kombiyuutarka iyo barnaamijyada kale ee waxyeellada leh.
7) Ardaygu waxba kama beddeli karo haadhweerka ama softiweerka aaladda, iskumana dayi karo gelitaanka aan la fasixin ee kumbuyuutarada, iyo/ama **ma kharibi karo ama ma burburin karo kombiyuutarka** ama feylasha kombiyuutarka. Waxyeelada ula kaca ah ama dhaawaca dayacaada ka yimaada ee kombiyuutarrada ama softiweerku waxay dhalin karaan xukun dambiyeed.

8) Ardaygu iskuma dayi karo inuu helo, eego, wadaago, ama keydiyo wax kasta oo aan laga aqbali karin goobta dugsiga. Tan waxaa kamid ah (laakiin kuma koobna) waxyaabaha ay kamidka yihiin muuqaalada qaawan, fisqiga, rabshada, ama sawirada, codadka, muusiga, luuqada, muuqaalada xunxun ama waxyaabaha kale.
9) **Ardaygu aaladdiisa ama xarkaha jaarjarka ma aamaaneysiin karo dadka kale**.
10) Ardaygu marnaba kagama tagi karo aaladda baabuur ama meel kale iyada oo aan cidi ilaalinayn.
11) Ardaygu ma cuni karo ama cabi karo isagoo isticmaalaya aaladda ama wax kuma ag cuni karo ama cabi karo aaladda.
12) Ardaygu kuma isticmaali karo kagamana tagi karo aaladda meelaha khatarta badan sida miisaska qarkooda, sagxadaha, kuraasta ama xayawaanka guryaha lagu haysto.
13) **Ardaygu wax ma dul saari karo aaladda dusheeda**, kagama tagi karo bannaanka/dibadda, ama kuma ag isticmaali karo biyo sida barkad.

Qirida iyo Saxeexa Ardayga

Waan akhriyay ama waa la ii sharxay waanan fahmay Adeegsiga La Oggolyahay ee Ardayga iyo Tilmaamaha Badbaadada Internetka ama Xeerka Anshaxa Ardayga. Waxaan aqbalay inaan u hoggaansamo xeerarka iyo shuruudaha ku xusan Adeegsiga La Oggolyahay ee Ardayga iyo Tilmaamaha Badbaadada Internetka ama Xeerka Anshaxa Ardayga waxaanan aqbalay inaan u isticmaalo aaladdan ujeeddooyin waxbarasho.

Taariikh:	SAXEEXA ARDAYGA: